



TILMAAMO AAD GURIGAAGA OGA DHIGAYSO MID QABOOW AADNA KU KAYDSANAYSO TAMARTA

Inaad gurigaaga ku qaboojiso mukeef ama bamka kuleelka ayaa keenaysa in qarashka korontadaadu aad u bato qaabab aad ka dheeraan kartay. Halkaan waxaa lagu muujinaya dhoor tallooyin oo aad gurigaaga ku qaboojin karto si qarash yar.




Kuleelka ka bixi jikada. Cunto karinta guriga, gaar ahaana adeegsiga ofenka, ayaa soo saari karta kuleel badan oo aan loo baahnayn. Mikrooweef, digsigada cadaadiska wax ku kariya ama digsi dhoobo ah ayaa soo saari kara kuleel aad u yar, taasoo qaboojinaysa jikadaada.



Si tashiilan u adeegso marwaxadaha la qaadi karo.

Marwaxadaha la qaadi karo iyo marwaxadadaha safiitada ah ma qaboojiyaan meesha; taas badalkeed, waxay ka caawiyaan dadka meesha jooga inay raaxo dareemaan ayagoo hawada gaarsiinaaya maqaarka. Xaqiiqdii, matoorka marwaxada ayaa kordhin kara heerkulka qolka cunaayana korontada intay soconayaan. U adeegso kaliya marwaxadaha noocaan ah kaliya qolalka dadku ka buuxaan.



Raac meesha hawadu ka imaanayso. Marka marwaxaduhu ay hawada siinayaan gurigaaga ma qaboobaayo, laakiin inaad hawada banaanka guriga u furto ayaa qaboojin karta. Hawada kulul kor ayay u kacdaa, marka furitaanka daaqadaha kore iyo kuwa hoosaba ayaa soo galin karaan guriga hawo qaboow oo kasoo galaysa daaqadaha hoose halka midda kululna ka baxayso daaqadaha kore.



Muhiimad sii tashiilida tamarta. Xagaagu waa waqti ku habboon inaad badasho ama cusboonaysiiso nidaamka kuleeliyaha ee duqoobay mid cusub, tignooloojiyada bamka kuleelka oo waxtar leh. City Light ayaa bixinaysa qiimo dhimisyo waxgal ah oo la siinaayo macaamiisha iibsanaayay bamamka tamarta aadka u dhaqaaleeya kuleelka oo ay gadayaan ganacsato kaladuwan oo maxali ah. Booqo seattle.gov/appliances si aad u hesho xog dheeraad ah.



Dagso xakameeyaashaada qaboojinta tamarta

dhaqaalaynaysa. Haddii aad haysato nidaamka kuleelka dhaliya, ku xir heerkul sare oo aad ku raaxaysan karto, una daa cabirkaas. Bamka kuleelka ayaa adeegsanaayay cabirkiisa gudaha si uu u qaboojiyo gurigaaga.



KHAYRAADKA MACAAMIISHA UU SAAMEEYAY CUDURKA COVID-19

City Light waxay halkaan u joogta inay ku caawiso inta lagu jiro aafada COVID-19. Adeegyada korontadu ma damin doonaan korontadaada sabab la xariirta inaad qarashka korontada bixin inta lagu jiro xaaladaan degdega ah.

Haddii dakhligaagu cariiri galay, fadlan nalasoo xariir si aan kuula dajino qorshe qarash bixin adoo wacaaya (206) 684-3000 ama iimeel u diraa 24/7 ciwaanka seattle.gov/utilities/about-us/email-question.

Hel liiska buuxa ee barnaamijyada caawimaada biilka biyaha iyo korontada iyo khayraadka kale ee bulshada oo aad ka helayso <https://powerlines.seattle.gov/2020/03/18/covid-19-resources>.



Seattle City Light



seattle.gov/light

twitter.com/SEACityLight



facebook.com/SeattleCityLight



SEATTLE CITY LIGHT IYO GOOB BEERASHADA, MEEL KU HABBOON UBAX BEERAYAASHA

City Light waxay iskaashi la samaynaysay haayada aan faa'iido doonka ahayn ee maxaliga ah The Common Acre oo ka shaqaysa beerta ubaxyada oo ku taala Koonfurta Beacon Hill lagasoo bilaabo 2018. Xaruntaan waxay qayb ka tahay aaga korontada ee Green Line, oo ah mashruuc lagu hormarinaayo soo celinta tamarta ee bulshada oo lagu samaynaayo marinada korontada oo u dhaxeeya xarumaha yaryar ee ku yaala koonfurta Beacon Hill iyo Koonfur-galbeed Seattle.

The Common Acre, oo kaashanaysa mutadawiciinteeda iyo iskaashatada kale, ayaa beertay laba hektar oo dhulka horay loo baneeyay ah oo ku yaala aaga Green Line kuna beertay geedo maxali ah oo taageeraya dadka ubaxyada beera.

Waxay qaabtaan munaasabadaha mutadawiciinta si looga jaro sunta loona dhoobeeyo beerta. Xaruntaan waa qayb kamid ah "xeelad lagu abuurayo 'xarumo iyo saldhigyo' oo lagu samaynaayo dhulka bulshada, ee ujeedada cusub loo adeegsanaayo kaasoo noqon kara 'xarun' leh tamar casri ah iyo meel lagu dhawro bii'ada iyo dhaqanka."

Ma doonaysaa inaad xog dheeraad ah ka ogaato shaqadaan cajiibka ah? Booqo <https://commonacre.org/programs/the-green-line>.

ADEEGYADAADA CUSUB EE KORONTADA BARTA SHAQSIGA AH EE XARUNTA AYAA SHAQAYNAYSAA

Waxaan ku faraxsanahay inaan shaacino bilaabida webseetka cusub ee adeegyada guriga ee Magaalada Seattle. Barta la casriyeyay waxaa ku jira qayb gunooyin bixisa si kor loogu qaado khibrada adeegaaga macaamiisha. Marka lagu daro adeegyada oonleenka ah ee horay u jiray, qaar kamid ah qaybaha cusub waxaa ku jiri doona:

- Inaad si fudud iskaga qorto miisaaniyada biilka
- Helitaanka xogta isticmaalka maalin kasta ee tamarta macaamiisha oo lagu samaynaayo cabirayaal casri ah
- Qalabka adeegyada macaamiisha oo casri ah



Ka billoow barta myutilities.seattle.gov!

Fadlan ogsoonow: macaamiisha biilalkooda ku dhiibaaya barta oonleenka ah ayagoo adeegsanaaya nidaamkeena hadda jira waxaa laga codsan doonaa inay badelaan baasweerkooda.



AT WORK 
in your neighborhood

Kooxda **Seattle City Light** waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: gelinta fiilooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka ee lagu badelaayo kaabayaal aan dhamaaneen;
- Chinatown-International District: U badalida fadhigada nalka ee hoos ka xiran oo lagu badelaayo nalalka LED meelo badan oo wadooyinka isdul mara ku yaalaan;
- Delridge: baddelka tiiraarka korontada dhamaaday, fiilada korontada iyo qalabka si ay uga caawiso hagaajinta hanaanka koronto ee jira;
- Downtown Seattle: Waxaan rakibaynaa fiilooyinka dhulka hoostiisa mara oo ka samaynayno 4th Avenue iyo Stewart Street si aan u xaqiijino sugnaanshaha korontada;
- Aaga Adeegga: waxaan badelaynaa baalayaasha korontada ee duqoobay dhammaan aaga adeegga korontada si aan kor ugu qaadno badqabka iyo isku halaynta korontada.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto sharaxaad booqo seattle.gov/light/atwork si aad u hesho qariiradeena aadna wax badan uga barato mashaariicda gaarka ah.



TILMAANTA BADQABKA GOOBTA

"Ma waxaad adeegsataa daaqada ama aalada AC la qaadi karo? Fiiri fiilada aaladaada iyo bareeska aad galinayso jaajarkeeda. In dabku ka bato bareeska waxay keenaysaa khatar ah in dab ka dhasho. Waa inaad ku daarin wax ka badan hal aalad godka bareeska.*